# Codkaagu Isbeddel Ayuu Sameyn Karaa

Dimuqraadiyaddu waxay ku dhisan tahay go'aanno wadajir ah. Markaad isticmaasho xuquuqdaada cod bixinta, waxaad qaadaysaa mas'uuliyadda bulshada iyo dadka kale ee aad la nooshahay. Marka aad coddeynayso doorasho, waxa aad ka qaybqaadanaysaa xulashada musharixiinta siyaasadda, waxaanad saameyn ku leedahay go'aamada saameyn ku yeelanaya noloshaada.

Soo bax maalinta doorashada ee Salaasada 18-ka Noofambar oo dhiibo codkaaga. Codkaagu isbeddel ayuu sameyn karaa!

## Yaa coddeyn kara?

Waxaad coddeyn kartaa doorashooyinka gobolada iyo degmooyinka, haddii aad:

- tahay 18 sanno jir
- haysato deganaansho rasmi ah oo aad ku joogto Denmark
- aad tahay muwaadin u dhashay Denmark, qof u dhashay waddan kale oo EU ah, haysta dhalashada Norway, Britian ama Iceland - ama haddii aad ku noolayd Denmark, Greenland ama Jasiiradaha Faroe 4-tii sanno ee ka horeeyay doorashada.

## Sida loo coddeeyo

Qof kasta oo xaq u leh inuu codeeyo wuxuu boostada ku heli doonaa kaadhka codbixinta. Kaadhka codbixinta ayaa kuu sheegaya taariikhda doorashada iyo goobta aad ka codaynayso. Caadiyan waxaa la coddeyn karaa inta u dhaxeysa 08.00 subaxnimo ilaa 20.00 fiidnimo.

Saraakiil ayaa jooga goob kasta oo codbixineed si ay u xaqiijiyaan in wax walba ay u socdaan si waafaqsan sida ay dhigayaan xeer hoosaadyadu.

Markaad timaado goobta codbixinta, waxaad tagtaa miiska doorashada ee ku qoran kaadhkaaga codbixinta. Marka aad tagto miiska waxa aad u dhiibi doontaa kaadhkaaga codbixinta, saraakiisha miiska fadhiya ayaana ku siin doona laba kaadh oo aad ku kala coddeyn doonto doorashooyinka degmada iyo gobolka. Warqada codbixinta ayaa waxaa ku qoran xisbiyada siyaasadda iyo musharaxiinta. Waxaa lagu weydiin doonaa inaad sheegto taariikhda dhalashadaada si loo xaqiijiyo inaad tahay qofka lagu tilmaamay kaadhka codbixinta.

Waxaad u qaadan doontaa kaadhadhka codbixinta xayndaabka codbixinta, halkaas oo aad keligaa aadi doonto. Coddeyntu waa qarsoodi, cid kalena

S O M A L I S K

looma oggola in ay aragto qofka aad u coddeysay. Ku calaamadi isku-tallaab (X), - adigoo isticmaalaya qalin beensalka ama qalinka caadiga ah ee yaala goobta codbixinta, - musharraxa, ama xisbiga aad rabto inaad u coddeyso. Waa muhiim inaad hal isku-tallaab ku calaamisid warqad kasta. Haddii kale, warqada codbixinta waxaa loo tixgelin doonaa mid aan ansax ahayn.

Haddii aad wax khalad ah ku qorto warqadda codbixinta, waxaad ka codsan kartaa saraakiisha inay kuugu beddelaan warqadda cod bixinta mid cusub. Si kastaba ha ahaatee, tani waxay suurtogal tahay oo keliya haddii aanad wali ku ridin warqadda cod bixinta sanduuqa cod bixinta. Haddii aanad hubin sida loo codeeyo, waxaad caawimo weydiisan kartaa saraakiisha jooga goobta cod bixinta. Haddii ay kugu adag tahay inaad akhrido Af Dhaanishka, mid ka mid ah saraakiisha ayaa ku caawin kara.

Ugu dambayntii, waxaad ka bixi doontaa xayndaabka cod bixinta waxaanad ku ridi doontaa mid kasta oo ka mid ah warqadaha cod bixinta sanduuqa saxda ah. Xusuusnow inaad isku laabto waraaqaha codbixinta, si qofna uusan arkin cidda aad u coddaysay.

**Haddii aanad awoodin inaad aado goobta cod bixinta maalinta doorashada - horay u sii codee**

Waxaad ka akhrin kartaa wax badan oo ku saabsan sida loo coddeeyo doorashooyinka bogga internetka ee wasaaradda arrimaha gudaha iyo caafimaadka ee Denmark adigoo sawiraya QR-koodhkan.

